

HIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIKA



## الجريدة الرسمية

JAMHURIYADDA DEMOKRAADIGA SOOMALIYA

لصيحة الرسالة

Sannadka 10aad Muqdisho I Nofembed 1982 L.11

### FAAFINTA BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QOMADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadki waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu hi bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. haddii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista nka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Raami ge ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Caanhuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

◆◆◆◆◆

QAYBTA KOWAAD  
S H A R C I

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO  
ISGAARSIINTA L. 14 Taariifada Boo  
stada Gudaha iyo Caalamiga BOG. 1016

XEER WASAARADDA BOOS. IYO ISGAARSIIN L. 14.  
Tariifada Boostada Gudaha iyo Caalamiga.

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Di-  
muqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Nidaamka Dowladda iyo  
qaabka dhismaha Dowladda xubin 2aad ee qodob-  
ka 3aad ee sannadka 1961kii:

ISAGOO ARKAY: Qodobka 21aad Sharciga Boostada tirsigiisu yahay 62 soona baxay 22ka Setember, 1971kii;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagamamaar-maan in la sameeyo tariifa Boosta oo lagu beddelo tii hore;

ISAGOO TIXGELIYHEY: Wada tashiga uu la yeeshay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

### WUXUU XEERIYHEY

Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 1da AGOSTO 1982da tariifada Boostada waxaa laga dhigay sida tan halkan ku lifaan-qan (1 — 45).

Qodobka 2aad

Tirtirid (abolition)

Xeerkani wuxuu tirtirayaa xeerkii ka horreeyey ee soo baxay 1da Luulyo 1981kii kuna saabsanaa Tariifa-da Boostada.—

Qodobka 3aad

Dhaqan gelin

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Agosto, 1982 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah-Muqdisho, 31 Lug. 1982

WASIIRKA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA  
Jaalle Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad

WASIIRKA W. MAALIYADDA  
Jaalle Cabdullaahi Axmed Caddow

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,  
Diiwaanka lam. 9 bog. lam. 222,

Muqdisho, 3.11.82.

Hantidhowraha Guud  
Dr. Xuseen Cabdulle Cali